

Masuuliyada Daryeelka



Masuuliyada daryeelku waxay ka hadlaysaa waajibaadka iyo masuuliyada dadka awooda leh ka saaran dadka ay masuulka ka yihiin. Haddii waajib daryeel lagu leeyahay waxay ku xiran tahay qayb ahaan booska qofka awooda leh, khaasatan mansabkiisa khabiir aqoon sarre leh ahaan. Caddaynta in waajibaadkii daryeelka la jebiye waxay keentaa maxkamad u xakunta magdhow cidda dhaawacu gaaray si loogu guddo dhaqaalihii lumay.

Masuuliyada daryeel ee daryeelka ilmaha

Sida muuqata dadka ka shaqeeya daryeelka ilmaha waxaa lagu leeyahay masuuliyad daryeel waxaana ku leh ilmaha daryeelkooda ku jira. Marka la tababaro shaqaalaha waxaa loo arkaa inay yihiin aqoonyahano, in kastoo taasi isbedesho iyadoo ku xiran heerka iyo xadka tababarka. Masuuliyada daryeel carruurta keligood ma ay laha, waxaase ku leh waalidkood iyo qoyskooda, kuwaas oo ka filaya shaqaaluhu inay isticmaalaan khibradooda si ay ugu daryeellaan carruurtooda.

Heerka masuuliyada daryeelka lagu leeyahay waxay ku xiran tahay qayb ahaan mansabka qofka daryeelka lagu leeyahay. Masuuliyad daryeel oo aad u sarraysa waxaa guud ahaan leh carruurta waxaana taas sabab u ah awooda ay iyagu isku daryeellayaan oo xadadan, inta ilmuhu yar yahayna masuuliyada daryeel oo loo baahan yahay waa sarraysaa.

Caddaynta jebinta masuuliyada daryeelka

Marka ay dacwo timaado, waxa ugu horreeya oo la eegayaa waa in ay jirto masuuliyad daryeel. Talaabada ku xigtaa waa in la caddeeyo in la jebiye. In sidaas la sameeyo maxkamadu waxay eegtaa waxa qofka macquulka ahi ka filan karo marxaladaas.

Daryeellayaashu waa inay raacaan waajibaad qoran oo lagu xusay heshiiska ay la galeen mashruuca ama adeega, konturaada waalidka, sharciga, sharciyada laysan siinta iyo waajibaad kale oo kasta oo la socda masuuliyada daryeel ee ilmuhu mudan yahay. Qofku inuu raaci waayo kuwaan mid ka mid ah waxay sahahaa in la caddeeyo in la jebiye masuuliyaddii daryeelka.

Caddaynta dhaqaale lumay taas oo ka timid jebinta masuuliyada daryeelka

Caddaynta dhaqaale lumay maaha had iyo jeer wax sahlan. Marka ugu horreeya waxa lumay waa inuu muuqdaa. Tusaale sahlani waa in ilmaha wax ku dhaceen intuu ku jiray daryeelka, kaas oo keenay jebin cad oo ka timid daryeellaha masuuliyada daryeelka ilmaha. Waalidka ayaa lala xiriiira si loogu sheego shilka, iyo in ilmaha ambalansi u qaaday isbitaal. Waalidkii oo ku socdaalaya xawaare sarre kuna sii jeeda isbitaal, ayaa gooyey ishaaro guduudan, wuxuuna galay shil culus mana awoodo inuu shaqeeyo saddex bilood.

Muxuu waalidku ku dacwoon karaa inay ka lumen? Waa iska cadahay inuu jiri doono kharaj daaweyneed dabcan waxaa loo baahan doonaa daryeelid siyaada ah. Arrinta aad looga murmi karaa waa waxa dhacaya haddii waalidku sheegto wixii ka lumay saddexdii bilood, iyo kharajka ka galay daaweynta. Maxkamada keliya ayaana go'aan ka gaari karta waxa lumay oo la saadaalin karo, welibana, go'aanku wuxuu ku salaysnaan doonaa waxa qof macquul ahi ka samayn lahaa xaalladaan.

Khilaafaadka

Xaallada soo bixi karta waa khilaafka daryeellaha masuuliyadiisa daryeel. Tusaale ahaan, waajibaadka lagu ilaalinayo waxyaallaha sirta u ah carruurta iyo waalidkood waxaa laga yaabaa inay khilaaf ku keento marka arrini soo baxdo taas oo caadatan u baahan qarsoodiniimo buuxda laakiin marka loo sheegi waayo macluumaadka waalidka ilmaha kale waxay ku keeni kartaa carruurtaas khatar waxayna sababaysaa jebinta masuuliyada daryeelka.

Gabagabo

Si looga fogaado dhibaatooyin, waa muhiim in kuwa loo shaqeeyo iyo daryeellayaasha iskood u shaqaystaa ay qaataan caymis wanaagsan ayna raacaan shuruudaha looga baahan yahay. Intaas ka sokow, daryeellayaashu waa inay raacaan dhamaan waajibaadka mashruucu ka hadlayo, wakiilka, ama adeega iyo weliba heshiisyada waalidka iyo sharciyada laysan siinta. Wada-hadal furan oo u dhexeeya waalidiinta iyo daryeellayaasha wuxuu u ogoolaadaa waalidiinta inay sheegaan welwel kasta oo ay qabaan waana in lagu qanciya in ilmuhoodu gacan amaana ku jiro.

Xaashida xaqiiqada waalidka waxaa lagu helli karaa oo ay ku qoran tahay luqada badan oo bulshadu ku hadasho waxaana lagala soo bixi karaa websaytka Early Childhood Connections oo ah: www.econnections.com.au

Dadaalka

Waxaa taageeray



Australian Government
Department of Family and
Community Services

National Childcare Accreditation Council